

Wax ka Bedelka Miisaaniyadda Laba Sannadlaha Dhexe ee la soo jeediyay 2023-2024

Miisaaniyadani waxay ka tarjumaysaa Ballanqaadka joogtada ah ee Duqa Magaalada Seattle Bruce Harrell iyo maalgashiga ficilada leh ee diirada saara baahiyaha bulshooyinkeena oo horumarinta ahmiyadaha **Seattle Mid ah**. Duqa magaaladu soo jeedintiisu waxay sii waddaa maalgelinta abuurista bulshooyin ammaan ah oo caafimaad qaba. Miisaaniyadani waxay taageertaa dadaalada lagu bixinayo badbaadada dadweynaha, dhisida guryo la awoodi karo, wax ka qabashada dhibaataada guri la'aanta, ka hawlgelisa Bartamaha Magaalada meel degeyaasha, shaqaalaha, iyo booqdayaashu ay rabaan inay waqti ku qaataan, iyo horumarinta fursada iyo sinnaanta dadka oo dhan.

Xafiiska Farshaxanka iyo Dhaqanka, miisaaniyada la soo jeediyey waxaa ku jira:

- \$1,000,000 oo lagu siyaadinayo barnaamijka deeqda ee Hope Corps (barnaamijka isku xira fannaaniinta shaqadu ku yar tahay iyo kuwa aan shaqayn ee ay helaan fursado hormarin xirfadeed) ilaa 2024 iyadoo diiradda la saarayo Downtown (magaalada hoose).
- Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha waxay rabtaa in ay iskaashi la sameeyaan oo \$1,000,000 ay u taageeraan hal-abuur dhaqaale iyo hawlgelinta Xarunta King Street iyo xaafadaha faras-magaalada ku hareersan.
- Maalgelin hal mar ah oo \$650,000 ah oo lagu taageerayo ururada fanka iyo dhaqanka ee ka soo kabanaya masiibada
- Abaalmarinta deeqda ah ee socota hagaajinta oo ah \$257,100 si wax looga qabto sicir-bararka dhawaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee miisaaniyada la qorsheeyay, ka akhri duqa war saxaafadeedkiisa [:Duqa Magaalada Harrell Wuxuu Iclaamiyey Soo-jeedinta Miisaaniyadda 2024 - Xafiiska Duqa](#)(Lifaaq Ingiriis ah)